72

WAXAA KU JIRA 40 MAANSO OO

MAANSOOYINKII RAGGII HORE AH

WAXAANA SOO HABEEYEY QORE

CABDI MIRE CALI

27/3/1984

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI
WUXUU KA TEGEY REERKIISA ISAGOO U SADCAALAY
MAGAALADA BERBERA, MARKAASUU AAD UGU RAAGEY
MARKII UU KU SOO NOQDAY REERKIISII AYAA LA
WARAYSTAY OO LAGA WARAYSTAY DALKII UU TEGEY
IYO DABEECADIHIISA DABADEEDNA WUXU KU WARAMAY
MAANSADAN SOO SOCOTA WUXUUNA YIDHI;

DAARAHA MAGAALADA INAAN, DAAWASHO U JOOGEY
OO AAN DAYACAY XOOLIHII, WAA DALIIL DHABAHE
WARBAA ANIGA IGA DAAHANAA, AMA DABOOLAAYE
DAB LA CUNAYO DOOG IYO CALEEN, LA ISKA DAAQAAYO
DUQ CARUUR SIDEED U HADLAYOO, DEREJO LOO YEELAY
DABEECADAHA CAYNKAASA , OO IGA DA'WEYNAADEY
AAN WELI DUBAAQAYGA GELIN, DIIRIYOW ANIGA
DALKII AAN KA IMI BAY JIRAAN, DUUL SIDAAS IHIYE.

DUUNYO NIMAN WAX UGA FOOFAHAYN, DARIBNA WAAYEYNIN
DELEB CAANEHEEDA IYO SUBAG, LAYSKU DARAY HAYSTA.
WARBAA ANIGA IGA DAAHANAA, AMA DABOOLAAYE
DABEECADAHA CAYNKAASA OO , IGA DA'WEYNAADEY
AAN WELI DUBAAQAYGA GELIN, DIIRIYOW ANIGA
DALKII AAN KA IMI BAY JIRAAN, DUUL SIDAAS IHIYE.

DAD DHAMAAN SIDII CULIMADII, DUUB CAD WADA QAATAY
OO DIINTA WADA CAAYAYAAN, CIDI KA DIIRAYNIN
DENBI LAGU HADLAAYO IYO CEEB, LA ISKU DOONAAYO
WARBAA ANIGA IGA DAAHANAA, AMA DABOOLAAYE
DABEECADAHA CAYNKAASA, OO IGA DA'WEYNAADEY
AAN WELI DUBAAQAYGA GELIN, DIIRIYOW ANIGA
DALKII AAN KA IMI BAY JIRAAN, DUUL SIDAAS IHIYE

EEG BOGGA KALE

# WAA ISLA ISAGII

DAD HESHIISA DOODINA DHEX TAAL,
OO QAARBA DOC U YAACAYAAN,
AAN WAXAY DEYDEYAYAAN LA ARAG,
WARBAA ANIGA IGA DAAHANAA,
DABEECADAHA CAYNKAASA
AAN WELI DUBAAQAYGA GELIN,
DALKII AAN KA IMI BAY JIRAAN,

AMA DAGAAL WEYNI
OROD KA DAALAYNIN
AMA DIBOODAAYA
AMA DABOOLAAYE
OO IGA DA'WEYNAADEY
DIIRIYOW ANIGA
DUUL SIDAAS IHIYE.

DULUGLE CAYDHA AAN MAAL ADUUN,
AAN DAWLAD SHUQULKEED KU JIRIN,
OO DAHAB XARIIR IYO KA SIMAN,
WARBAA ANIGA IGA DAAHANAA,
DABEECADAHA CAYNKAASA,
AAN WELI DUBAAQAYGA GELIN,
DALKII AAN KA IMI BAY JIRAAN ,

WAX U DAREERAYNIN
AMA DUKAAN HAYSAN
DAABAC DHEER LACAGA
AMA DABOOLAAYE
OO IGA DA'WEYNAADEY
DIIRIYOW ANIGA
DUUL SIDAAS IHIYE.

WAA DHANYAHAY

§§§§§§§§§§§§§§§§

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI
WUXUUNA U TIRIYEY NIN WADAAD AHAA OO KAGA
EEXDAY QOOMO UU U XAQAYEY, DABADEEDNA
WUXUU YIDHI;

BA'NAN AWRA QAALMO IYO CURAD, BAARQABKIYO GOOLKA
IYO BAATIR DHALIWEYDEY OO, BOODH KA KICI WEYDEY
INKASTUU KA BUUXSADO XERYAHA, BOGIYO HEEMAALBA
AMUU BOQOL KUNOO ADHIYA IYO, LO'IYO BEER YEESHO
AMUU BELEDKA DAARAHA KU YAAL, BAAL DHAN WADA QAYTO
BAFTUU KALA TAGAA RUUX KASTOO, BAAWAR KU LAHAAYE
BERI WEEYE OO DUNIDA WAA, LAGA BOQOOLAAYE
WAXAA BERETAN LOO YAHAY KHALQIGU, buuga aakhire'e
BAHDAADIYO XIGAALKAA JANADA, KUGUMA BEEGAANE
BOGGA ADIGA KAAGAMA CESHAAN, BELELKA NAAREEDE
HADDAAD BARATO WAA SHAY CILMIGU, BAAHI LOO QABO'E.
XAQA LAGAMA BAYDHO'E RUNTAA LALA BADHEEDHAAYE
WAA LAGU BARTAA DIINTA SHEEKH, BIICSADOO GADA'E
BA'NA WOW DANBEEYAA CADAAB, BEERKA LOO DHIGO'E
BELAAYADA DANBAYSIYO QABRIGU, KULAMA BUURAANE
BAAB DHAAFTAY GOORTAY TOLKAA, KUGU BAROORTEENE
BOGGAN WAA HURDADA RUUX HADDAY, GODOBI BAAL TAALE
BAL OGOW NABSIGU WAA MIKAAN, BAAQAN WELIGIISE.

WAA DHANYAHAY

§§§§§§§§§§§§§§§§

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY MAXAMUUD CALI.

MAXAMUUD WAXAY KALA GUUREEN NIMAN AY ISKU TIIRSANAAN JIREEN, MARKAASUU MAANSADAN TIRIYEY ISAGOO XIGAALKII UGU DIGAYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

| | |
|---|---|
| DAWAAFTAYE HADDAAD HIIRADOW, | DAWGA SII QABATO. |
| HADDAAD DEGELKA HAARUUN TAGTIYO, | DUUDA REER CALIYA. |
| WAR HADDII LAGAA DAYO ADOO, | DAAL LA CABANAAYEY. |
| DAMEERKII MADOOBAA HADDUU HADAL, | KU DOOCDOOCSHO. |
| DA'DA GABAYGA WIILKII ROGAANU, | DAAWO LEENAHAYE. |
| DEEQSII XARBIGA SHALAY RAGII, | DIGASHO NOO KEENAY. |
| IBRAAHIIM DANOOD IYO U GUUR , | DEGALADIISIIYE. |
| KALA DURUGNAY NIMANKAAN LAHAYN, | WEYNA DILAYAANE. |
| DUULAAN DANBAY NALA BAXSHAAN, | DIB UMA EEGTAANE. |
| WAR HOY DIRIRA WAAGII CILAAN , | LAGU DAGAALAAYO. |
| DEBRA DUULKA DEYR IYO XAYAAN, | IDINKA DAAHDEENE. |
| WAY IDIN DUL IMAN GUUTADII, | DAALINKA AHYADE. |
| DIGTOONAADA WAA MAALMAHAAN, | SOO DABRAYN JIRAYE. |
| DANOOD IYO XAYAABLIYO HALKAY, | DAYRTU QABANEYSEY. |
| DALSANKII KA CAAG GEELASHAAD , | DIR U LAHAYDEENE. |
| WAR HOY DIRIRA WAAGII CILAAN, | LAGU DAGAALAAYO. |
| WAA DEBIN QANIIN MAALIN GUUR , | DAYRTAN MAANTA AHE. |
| DUBIHII UGAASKUNA COLBAY ; | KULA DAMCAAYEENE. |
| INAY DURUSA QAATAAN LAWAA, | DAAYIN ABIDKOODE. |
| WAR HOY DIRIRA MAANTII CILAAN, | LAGU DAGAALAAYO. |
| DAAROOD WAXAA KUUGU XIGA, | DEGELKA HAARUUNE. |
| HADDAYSE DAAHIR WAAYEEN , | MA JIRO INAY KU DAAYAANE. |
| WAR HOY DIRIRA MAANTII, | CILAAN LAGU DAGAALAAYO. |
| DUGUR IYO WARAAR BAYDIN TEGI, | DOOGA KARIMEEDE. |
| DIQLAHAY KU GELIN CAMAJI IYO, | DANABYADOODIIYE. |
| WAR HOY DIRIRA MAANTII CILAAN, | LAGU DAGAALAAYO. |

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY MAXAMUUD CALI
WUXUUNA UGU CABANAYEY NIN UU ABTI U
AHAA. DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

YUUSUFOW ILMIYO OOHIN BAAN, KULA AG JOOGAAYE.
ARRADKIYO ILYAASNIMADU WAA, OLOLKI CAYDHEEDE.
ABJED BAAN QABAA WAANIGII, AADANAAN JIRAYE.
YAAN LAGU OQOON BAAN SHIRKII , UGA UFOODAAYE.
ARINKII KOBTAYDII QABYOW, URURTI GEEDKIIYE.
ADUUNKII AN HUDAY KUULA IMI, LAYGA ABA GOOYE.
XASAN AADAN YAA IGA AG MARAY, UUNKA WADA YAALE.
UTUN LAYGA RAADSHIYO MA QABO, EEQO GODOBEEDE.
WAXAY NIMANKU II AA-AYAAN, WAYLA AMANKAAGE.
GABADH LOO AROOSAY NIN RAGA, QOLO U AYDAAYE.
WAA INA ADEERTAY MIDDII, KUU UMA AHAYDE.
ABTI LAMA FUDAYDSADO NINKII, OOFTA KAA DHALAYE.
INDHA DHIIG MIYAAD TAHAY, MAXAAD ILA OQOON WEYDEY.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY MAAX COLOW DACAR. MAAX WUXUU BAAWEYNAYAA GABAYGIISA OO UU LEEYAHAY WADANKOO DHAN IYO HAGAADHO RAGA GABYA OO DHAN DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

BILOWGEEDA MAANSADA HADDAY , BAALI II QABATO.
BAWLAHA DURBAANKIYO HADDAAN, BUUNKA KOR U YEEDHSHO.
BARQA WAALKA SUBIXII HADDAAN, WADA BARIIMEEYO.
OO ROOBLE SIDA BUUFIYAHA , BELELKA II OOGO.
BEEQAAQA MUUSIYO HADDAAN, MAXAMED BOOBSIIYO.
XASAN WEERARKAAN BARAY HADDUU, BADH IYO WAAX GOOYO.
CABDI NUUR BU'AAYIYO HADDUU, FAARAXBA U BAYDHO.
HADDAAN AADANOW BEEJIN IYO, BULUXBA GAADHSIIYO.
BAXSIYOW CABEEYIYO HADDAAN, BAATILO U SHEEGO.
BEESHEENA OO IDIL HADDAAN ~~BERIBAXREER~~ BERIBA REER GEEYO.
IIDOW BILAASH WAAN U MARI, BARA ISLAAMEEDE.
KOLKA BAYLAH LOOGAMA WADO'E HAYSKA BOLOHLAYSO.
BULAXAAR MAGAALADA BERBERA, BOOTIN HA U GAADHO.
BERI CARABKA BUULKII ARDIYO, BADANE HAW DHAAFTO.
BAABUUR KOBTII LAGU DHIQIYO, BARI HA DOONYEYSO.
BUUHUUDLE BADOW KEENA DIID, BIDIXDA HAW DHAAFTO.
BAHALKII FARSAHA DIIRAN JIREY, BAANYO HA U QAADDO.
BEESHII UGAASKA HA MARTIYO, BAAHALOO IDILE.
BULSHADII~~X~~ ADOONTIYO BURQIYO, BELEL HA QOORDIIDO.
BAARRADA INTAA DHAANSATIYO, BEDI HA MAANSHAYSO.
BIYA MAALKA BUURAHAN HAWIYE, BERI DHAX HAW JOOGTO.
BOORAALE IYO REER BARTIRE, BADALI HA JIIDHO.
BURCO NIMANKA YAAL HAW DHACDIYO, BAARKA DHEMEL AADAN.
BOODAANADII REER AMAAN, BURUNDI HAW REENTO.
BANKA QAAWAN MEESHIYO BALAADH, BAARAX HAW SOCOTO.
INTA KALE SIDII BAHAL SHINIYA, BAYR HASOO MARISO.
BOQORADA MAXAADAAR ISAAQ, BADARI HAW JOOGTO.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHANJIREY
CALI GEES DIIR.

CALI WUXUU LA DEGANAA NIMAN UU GABADH KA QABEY OO UU ISKU HALEYNAYEY OO IS LAHAA, LAGUUSOO DHAAFI MAAYO. MARKAASAA NIMANKII WAXBA TARI WAAYEEN OO LAGU AG DHACAY. MARKAASUU MAANSADAN TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

DABEERAHA HARGEYSIYO GALBEED, DAAQATIYO FAAFAN.
NIMANKII INTAA DEGI JIRIYO, DUULKA REER KHALAFA.
DARFA GOOSI MOOYEE MA JABIN, DAWLADOOD BADANE.
DALAL IYO DUNTII SUGULE EE, DURI WALAALOWDEY.
DUMARKAAN KA GUURSADEY BA CELI, NALAGU DEYN WAAYE.
DUQSAW BADAN INTII LAGA ASKUMAY, DUNIYADEENEERE.
DABOOL HAANTA KAMA QAADI KARO, DAAR INTUU YAHAYE.
HADDII AANAN LA DEGIN REER TOLKAY, KAMA DUMAADEENE.
DAAHYAALE LAMA SOO TUBEEN, DALAWADAYDIIYE.
DAWA MALAHA MAGANTAAN HADHGALAY, LOO DAGAALAMINE.
DADKANA LOOMA CAABUDO NINKAAN, DIIFAD KULULAYNE.
WAAKAA NINKII GABADH DURQUMAY, DILAYA REER WEYDE.
DULEEDKOODA WAATUU GENBIYEY, DIRIRTI FAACUULE.
HADDAAN IDIN DUGSADO JAAMICII, DIRIRAY MOOYAANE.
AAN IDINLA DEGO AABAHAY, DUUDKI KAMA BEERMIN.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY QAWDHAN DUCAALE.
QAWDHAN WUXUU SOO QAADAY GEEL BADAN,
MARKAASUU MAANSADAN TIRIYEY ISAGOO KAGA
WARAMAYEY WUXUU RAG U GEYSTEY IYO SIDUU
USOO LIBEYSTAY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

CABDIYOW ADUUN BAA HURDEE, CAABUDLAA TIMIYE.

CARUUR BAAD TEHEE GEELA WAA, LOO CARTAMAYAAYE.

CAGTU WAY DALOOSHAA SIDAAN, CIIR U WEERARAYE.

CULIMOOYINKII LAGA DHECYOO, LAYSU CELIN WAAYE.

CILMIGAABA LAGA NAADIYOO, CADOW NALOO SHEEGYE.

CALKA SIBI CUFKII DHAGAX MADOW, CAWSKI KA IDLEEYE.

CANSHARAARIDII NAGA ~~XX~~ XIGTIYO, CAMINTA MAW JIIDHNAY.

SHAKAD CULUS COL WAABAY SITIYO, CIIDAN MA UU GEYNEY.

MA TAF DHEERIHII BAA CUSKADAY, LAGA CESHIIMEEYEY.

CEEL FUUD MIYAAN GOOLASHII, CAAWA LAGU LAYNIN.

CIIRTII LO'DOODII MIYAAN , LAGU CAWEYNEYNIN.

CODCODKII MAGAALADA MIYAAN , LAGU CASHUURAYNIN.

HADDAANU AWRKU NOO CIIDAN GELIN, CAMAR MA GAADHNEENE.

CAANAHA WERYOON KAMA DHANEEN, CALAFKI SHEEKHAALE.

CABDILAHA ALLAA NAGU RIDIYO, CUMAR RUGTIISIIYE.

IYAGAANU CAADH GOO AHAYN, CALIYO HAARUUNE.

CADAABKII GALAY NIMANKU WAA, CUDURAY KEENEENE.

CIIDDAA KA BADAN WEERARKAY , NAGU CIYAARSHEENE.

CAGTA WEBIGA KAMA SOO ROGEEN, CIDHIFKA DOOSHIIYE.

DAAROOD CADCEED IYO CADCEED, CAYDH LA DALANDOOLYE.

MA CAWAANSADEEN GAALKA IYO, CALANKA HOOSTIISA.

CARUURTIYO HAWEENKII MIYAA, CAARSHE LA HOR GEEYEY.

MA CIROOLIHII HERER TEGAA, KA CABEY SAABUUNTA.

WAA-DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY
CALI WARSAME.

CALI WAXAA LAGA LAAYEY RAG MARKAASUU AARSADAY. DABADEEDNA WUXUU TIRIYEY MAANSADAN OO UU KU TILMAAMAYEY RAGII UU LAAYEY IYO SIDUU WAX U GALAY WUXUUNA YIDHI;

SABAANADABA WAA IGA XIDHNAA, SAALAXOW GABAYE.
SIDAYDA UMA DEYNINE JIDKAA, DHACANI SAARAYDE.
AN SAMEEYO WAATAAD BERYAHAN, IGU SALUUGTEENE.
SAYLAHA LIBAAXUBA HADDUU, SEBENO GAAJOODO.
OO UU SANADO DHAWRA IYO , SAAYID HILIB WAAYO.
ISAGOO GAAJO SARANSEERISOO, SABARKU LIICAAYO.
HADDUU SARARA WEYN GEEL KA HELO, SURIN YAROO OODAN.
HALKUU SUGAYEY WEEYEE , MALAA SABAB DHARAARTAASE.
ANA WAXAN SAMRABA WAA NABSIGU, SAACAD KII YIMIYE.
SEDKII EEBBE II QORAY MIYAAN, SACABADOW HOORSHEY.
ANOO SUMUCA MAADHIINKA IYO, SAANAD BADAN HAYSTA.
OO AAN SAFEEYOO BUNTUKHA, DHAB U SALIIDEEYEY.
MIYAAN SUGAY WAX BADAN BAAN SUGEE, TOBAN MIYAAN SAYDHSHEY.
SAF MIYAA U GO'AY DHAAWICII, DHIIGU SOCONAAYEY.
SAKARAAD MIYAA QAAR YIHIIN, SAANADDII HURUDO.
SEEDAHA MIYEY QAAR JARTOO, LAGU SIDAA AWRTA.
SAXARDIID RAGUU DHALAY MIYAAN , IILKA WADA SEEXSHEY.
NIN SABAANO BADAN CIIL QABOO, SOOHMAY BAAN AHAYE.
MA HADDAANAN WELI SAAS KU HADHIN, SAYMO WAA GODOBE.
INAAN SABABO QAAR KALE MIYAAN, SAANADA U IIBSHEY.
SUN MIYUU KABADAY FAARIXII, SIXINTA LEEFAAYEY.

WAA DHAN YAHAY

~~MAANSADAN [illegible] TIRIYEY~~

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY

WEERAR BULXAN.

WEERAR BULXAN WUXUU DOONAYEY INUU KU DUULO NIMAN GODOBI KA DHEXAYSEY MARKAASUU RAG AY WADA DHASHEEN OO NIMANKA UU KU DUULAYO GABDHO KA DOONAY KU LAHAA NALA DUULA. MARKAASUU MAANSADAN TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

GABDHEHEENAA GUDGUDUUDANOO?
KUWEENAAN GAS LAHAYNOO,
KUWEENAA UL GALOOLA,
GARUUD LOOGU RARAAYE,
KACOO NOO GARBA YEELA OO
WAR GO'OOYIN NA RAACA.
HADDAAN GEEDIGAN GUURO'OO
GALBEEDKAA AN KU JIITO,
IDINKAY IDIN GAABINOO,
GOBOLKIINA XIGAANE,
KACOO NOO GARBA YEELA'OO
WAR GO'OOYIN NA RAACA.
HADDII GEEDKA LA GOOYO,
WAXA MAANTA GURAA,
GUDINTAA LA GESHAAYOO
ISAGA WAA GOBOLKIISE,
KACOO NOO GARBA YEELA OO
WAR GO'OOYIN NA RAACA.
GOOL BAA LAYGA ERYOODEY,
GASHAA LAYGU DHIRBAAXAY
GEENYAA WIIL IGA FUULAY
XAAJO SII GAG AHAYD IYO
MIDDII UUN GAR AHAYDBA
AAN IDIINKA GARAWNEE
KACOO NOO GARBA YEELA'OO
~~WAR GO'OOYIN NA RAACA~~
GUULEYSTOOYIN NA RAACA.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHANJIREY
CAWED ISMAACIIL.

CAWED WUXUU GABAYGAN UGU DHAARANAYEY
NIMAN AY WADA DHASHEEN OO IN BADAN KU
GARDAROODAY ISAGUNA UU AAD UGU DUL QAATAY
DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

DHAB DARADA HADDAAN LAYGA DEYN, DHICIYO DUULAANKA.
WAXBA DHAWRAN MAAYEE HADDII, DHALASHO LAY SHEEGTO.
AAN GEERI LOO DHALAYE MAWD, CIDI KA DHEERAYNIN.
WAA INAN DHIRFAA OO MARUUN, GACANTA DHIIBSHAAYE.
KAN DHEERAAD ISTAAWINAYA IYO, DHIIRI IYO XOOGBA.
IYO KUU DHALIILEE WAX BADAN, U HANJEBEE DHAARTAY.
KOL HADDII RASAAS LAYSLA DHACO, DHAMACDI MAADHIINKA.
DHAFANDHAAF HADDII LAYSKU RIDO, HUBAN DHAMAANAYNIN.
NINA DHAY KA DHAMI MAAYO IYO, CAANIHII DHEBIYE.
WALLEE DHIMASHO LOO SIMAN HADDII, LAYSKU DHIIDHIYO'E.
DHAAXAAN DHISOO NABAD WAX BADAN, TAAGEY DHIDIBKEEDE.
AAN DHAWRSADOO WAA BERYABA, CEEB LA DHEELMADAYE.
AAN DHAAWAC DUUDSIYEY ANOO, LAYGA QUBAY DHIIGE.
AMA AAN DHIRBAAXADA HABLAHA, DHAAFAY HADALKOODE.
DHIB KU GAADHA MOOYIYE WANAAG, KUU DHADHAMI WAAYE.
WAAN DHIIRAN CALIYOW HADDAAD MXRXXXBMX MAR I DHALIISHEENE.
NIN DHINTIYO NIMAY DHAAWACDIYO, NIMU ILLAAH DHAAFSHO.
NINBA WUXU KA DHEEFABA DAGAAL, WAA INUU DHACO'E.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI.

CILMI CABDI WUXUU MAANSADAN UGU JAWAABAYEY
ISMAACIIL MIRE OO U GABYEY MAXAMUUD GARAAD
DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

| | |
|---|---|
| HA'DA GABAY BERYAAN INA MIROW, | HAABKA KUMA HAYNNE. |
| HAASAAWIHIISII KA TEGEY, | HAYBADDA LAHAAYE. |
| MARNA KUMA HAMIYIN MEESHA IYO, | HOGOSHI DEYREEDE. |
| HURDADUU XALAY IGA KACSHOO, | IILA YIMI HIIFE. |
| KOL HADDAAN HOLADAY CAAWA WAAN, | HEEGA RIDAYAAYE. |
| AN HANAANSHO WAATAAN MURTIDA, | HAARIB KU AHAAYE. |
| HADDII LABA QABIIL HADAL DHEX MARO, | LANA HESHIIN WAAYO. |
| HADHACAA LA JIIFIYO HADDAY NABADDA, | HAYN WEYDO. |
| HADHUUB BUUXA WAA XXXX EEDI JIREY, | WIIL HAFSADEY XOORE. |
| HEDI NIMAY WADDAA BAAN WIQII, | HAWLYARAAN LEDINE. |
| WEDKU MIDU HUMAAJIYEY HADDUU, | SOO HOR KACO BAASKA. |
| HAWO LAYSLA JIIDHIYO HADDUU, | XXXXXX FAANKU HADHI WAAYO. |
| NINBA WUXU HAYABA WAA IN LAYSKA, | HOR YIMAADAAYE. |
| HABAR WACASHO WAATII DAGAAL, | AYDIN HURISEENE. |
| EE HEEL BANAAN LAGU KULMAAN , | CIIDAN KUU HADHINE. |
| MAXAAD KA HESHAY CEEBTAYDINAAN, | KA HAQAB BEELEYNE. |
| HUB JADIIDA GOORTII RASAAS , | HIRIRIGTEED YEEDHAY. |
| EE WIIL HUBSADAY OO YIQIIN, | HOOS U DHIGAY SHIISHKA. |
| RAGGII HAADKU GIGAY INAMADII, | HANAQA AY GOYSEY. |
| HALYEYADI WARAABUHU CUNIYO, | GEESIYADI HOOBTAY. |
| HILBOHOODA NIMANKII TUKUHU, | KA HIRQADEE LAASTAY. |
| HALBOWLAHA RAGIINII AHAA, | HIIRAD IYO FAARAX. |
| MIYAAN HANADADIINII MAQNAYN, | HAAWEY YAHAY MIIDHNI. |
| HABAR WACASHO WAATII DAGAAL, | AYDIN HURISEENE. |
| MAXAAD KA HESHAY CEEBTAYDINAAN, | KA HAQAB BEELEYNE. |
| HAWEENKII BAROORANAYEY IYO , | HOOGEYDII DUMARKA. |
| HAREERTAADA NAAGII ILMADU, | HIBITIQ LEYNEYSEY. |
| HORWEYNKII LA QAADIYO MARKEY, | HEEGAN OLOLEYSEY. |
| KAMAYDAAN HADHEEN TAMAR DARAAD, | UGA HAGAAGTEENE. |
| HOLASHANA MA DEYSEEN HADDAAD, | WAX ISKU HAYSAANE. |
| HAGOOG BEENA WELIGIINBA, | WEYSKU HUNBULEYSEENE. |
| HILQADLE IYO MAADHIINA WAADO | KU HANDARAAFTAANE. |
| HA YEESHEE LIB KUMA HOYSATAAN, | HEEGAN DIRIREEDE. |
| HABLAHAAD MALAA INAD TUSTAAN, | UGU HURTEEN GEELE. |
| HABAR WACASHO WAATII DAGAAL, | AYDI HURISEENE. |
| MAXAAD KA HESHAY CEEBTAYDINAAN, | KA HAQAB BEELEYNE./ |

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CABDI.

CILMI CARAB CABDI, MARKII UU ARKAY SAYID MAXAMED XUKUNKIISII IYO SIDA UU DADKA U LEYNAYEY AMA U DHACAYEY IYO DADKII OO DALKIISIIBA KA CARARAY, AYUU MAANSADAN OO UU KU WAANINAYEY SAYIDKA TIRIYEY ISAGOO COOMAADE USOO FARAYA. DABADEEDNA WUXU YIDHI;

COOMAADEYOHOW DUULAYAA, CODAN KU SII TAARTO.
COLAAD WEEYE OO DUNIDA NABAD, CAANA LAGA WAAYE.
CADAAWE IYO ADIGAANU JIRIN, CIIL RAG KUU QABAYE.
CAARAHA SHABEEL IYO ADAAN, KA CABSANAYN AARE.
CIYOON IIGA GEE XARUNTIBAAD, CAAWA TEGEYSAAYE.
CABDULLA XASAN INANKUU DHALOW, WEYS CAJEBISEENE.
CIRKA NIMU U QAADABA NABSIGU, HOOS USOO CELIYE.
DHAAXUU CAYAARSIIYEY NIMAN, CIIDNA HOOS MARIYE.
CIMRI LAGUMA WAARIYO ADDUUN, CALAN WALEYNTIISE.
COLAADNA LAGUMA LIIBAANO IYO, CAR IYO DUULAANE.
CUNA QABASHO SOOMAALI DIID, WIIL KU CAABIYA'E.
CAGA DHIGO RAG BADANBAA HORTAA, CANKAN EERSADAYE.
CULIMADU XURMAY KAGA HESHAA, CUUDKA AADMIGA'E.
CISI WAXAD KU WEYDEEN DAGAAL, KU CUNIMAYSAANE.
CUNA QABASHO SOOMAALI DIID, WIIL KU CAABIYA'E.
CAGA DHIGO RAG BADAN BAA HORTAA, CAYNKAN EERSADAYE.
CIIDAN HADDII U WAAYO NIN RAGA, CAAWIN LAGA QAADO.
UU CARARO MAANTAA COLBUU SOO, ABAABULIYE.
CAYDH IYO CALOOL XUMO WUXUU, CIIL LA DULUG LEEYO.
KOLUUN BAA ILLAAH CAAWIYAA, CUDUDNA SIIYAAYE.
CAABUQA KU JIRA JEER DANBUU, KUGU CIQAABAAYE.
CAYAAR UGAMA HADHO XOOLAHAY, CADOW KA QAADEENE.
CUNA QABASHO SOOMAALI DIID, WIIL KU CAABIYA'E.
CAGA DHIGO RAG BADAN BAA HORTAA, CAYNKAN EERSADAYE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI.

CILMI WUXUU MAANSADAN UGU JAWAABAYEY ISMAACIIL MIRE OO GABAY UU SAYIDKA KU AMMAANAYEY TIRIYEY, CIMLINA UU WAX KAGA SHEEGAYEY. DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

NINKII TALADA LAGA QAADAYAA, BELO TAFTAAFTAAYE.
TUB QALOOCAN RUUXII MARAA, WAA SIDAAD TAHAYE.
TEEYADA NIN KALE UU DHAQDIYO, MUUMIN TULUDIISA.
TUFKU KHAYRE SHIIKH IHI MA DHACO, TACAB ISLAAMEEDE.
WAA TUUG QADQAADIYA NINKOW, TAABACDEEN WELIYE.
KU TARAAWILKIISII SIDAAD, UGU TABAALOWDEY.
DHAAXAAN TILMAANAYE FALBUU, KUUGU XIDHAY TIIRE.
MARUUN BAAD KA TEGI LAYD, HADDAANAD SIXIR KU TAAGNEYNE.
HADDAAD TOOSAN TAHAY AAN IBLEYS, HOGOBYO KAA TUURIN.
RASAAS KUMA TAXDEEN INA MIROW, TALIYIHIINIIYE.
MID TUMAATI LAGU TAAGO IYO, TEERIGII WARANKA.
IYO TOOGASHADA MIDAY XABADI , NAASKA KAGA TAALO.
SIDII ADHI TADCAAR LOO QALIYO, WEERE MIDU TAABAY.
AMA MIDAY TAMOOTIYI GASHOO, TAWSI WADA LAYSAY.
TOBANTABANKA WAAKII U YIIL MEYDKA , TEEDSANIYE.
TARAB TARAB ADOW GAWRACAYE, CADOW MA TAALAYNE.
NIN SHISHEEYE TAAKULO U GALAY, TACABKI BEENOWYE.
TOOGGADA MARKUU KAA QUNSADAY, AAD TOLKAA MADHISAY.
ISAGANA TABTUU RABEY KUFRIGU, UU KA KALA TUURAY.
MA KAA TEGEY XIGAALKII DHULBUU, NABAD U TUURAAYE.
ADIGUNA TAWAAWAC IYO CIIL, TAAH MA LEDI WEYDEY.
TIIRAANYO AWGEED MIYAAD , TALASHAY OO REENTAY.
MA HADDAAD TEBEYSAA RAGAAD, TOOREY KU IDLAYSAY.
HALKA MAANTA AAD TAAGAN TAHAY, TAA ADAYS DHIGAYE.
HADDABA YAA KU TAAKULIN, BAHDAA WAADIGII TIRAYE.
ADAA TIRO YAREEYAYE, BAL YAA, CADOWGA KAA TIIRIN.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE
XASAN ISAGOO KAGA JAWAABAYA MAANSADII UU CILMI
CABDI U TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

~~XXXXXXXXXXXXX~~ COOMAADAYOHOW WAXAN KU SIIN, COODI IYO JIIDHE.
CAD BARUURLE BAAD MAALIN DHOW , UURKA KA CALAYNE.
CODKA AAN KU FARO GEE DHAKHSAAD, U CAYILEYSAAYE.
CAAQIIBO NIMAN KUU GELEYN, CADOW ITAALAYSTAY.
OO CIIDAN IYO XOOGLE IYO, COLAN KU DEYNEYNIN.
AAN CIDINA KAA DAAFACAYN, CADHO HADDAY KEENTO.
LAMA CAAYO DOQONIINADAAD, CAAC LA LEEDAHAYE.
CULIMADU KUWAAD MOODEY IYO, MA'AHA CAYNKOOD DHE.
CANKA WAXA AY GELIYAAN, ILLAAH CAADILAA QORAY DHE.
CASHAR KUMA BARYAAN AADANAA, CEEBNA WAY TAHAY DHE.
CALAACALAHA UMA HOORSADAAN, GAAL CIDIYA DHEER DHE.
MA CAWAANSADAAN NEBIYADII, NIMAY COLOOBEEN DHE.
OO LAMA CASHEEYAAN BAKHTINA, LAMA CANTUUGAAN DHE.
CARUURTOODA BAADERI RISIQA, U CODSAN MAAYAAN DHE.
NIN CAASIYEY ILLAAH IYO KUFRAY, CUDUD U SHEEGTAAN DHE.
CAAL UMA DHIGTAAN NIMAN ISLAAM, LAGU CISEYNEYN DHE.
CILMI NIMAN LAHAYN JAAHILNIMO, NIMAY CANDAADOWSHEY.
OO CAALENIMO LOOGU DARAY WOW, COD EEGTAHAYE.
CARABKAAGA INAD EEDEYSAA , WAA CADDAAN DHABA DHE.
CAAWIMO ILLAAH WAXA KA HELA, RUUXI CAABUDA DHE.
CIMRIGII JABYOW HAW FADHIYIN, CIIL BAX WELIGAA DHE.
CASIIS AMARKI MOOYIYE HALKAY, CAAWA TALO JOOGTO.
CAYNAB IYO IYAGA OO FARDAHA , WADA CAD KOORAYSTAY.
CUURKII IS DHAARSADAY BERAY, SOO CIDHBINAYAANE.
ISKA CELI NINKII RAGIHI WAA KII, CARGAAGTAMA'E.
HADDII KALE CALYADA DAADI WAA, CAADADII FULE'E.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI.

SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN, AYAA MARKII JIDBAALE
LAGU JEBIYEY EE UU NUGAAL KA CARARAY WUXU YIDHI;

KUFRAA NOO CUDUD SHEEGTAY
MUSLIMNA CIIDAN KA ~~XXXXXX~~ WEYNAYE.
YAA CISMAAN MAXAMUUDA.

MARKAASUU CILMI CARAB MAANSADAN HOOS KU QORAN
TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

~~XXXXX~~ CARADII NUGAALEED KUFRIGU, KUGUMA CIILEENE.
CIID KUGUMA SOO WEERAREEN, GAAL CADDAAN IHIYE.
CAGAHABA MA UU SOO DHIGEEN, MAXAMEDOW CAYNE.
CASAR KAMA BOQOOSHEEN INTAAD, CAL UGA GUURTAANE.
DAL CADAABA IYO MAAD GASHEEN, MEEL CIDHIIDH BADANE.
COLBA KUMA JEBSHEEN TALA XUMAAD, CUDUD KU WEYDEENE.
KUWO ADIGU AAD CAYDHISOO CIIL QABAA, WADAYE.
CAARA DHUUBTA WAXA KUULA YIMI, CIIDAN KAA TEGAYE.
CEELKII JIDBAALIYO BANKII, DARANTA COONKEEDA.
CADOW KUMA WARJEEFEEN RAGGII, CAAN AHAAN JIRAYE.
KUWII CAMALIYEYN JIREY TUKUHU, KUMA CASHEEYEENE.
GORGOR KAMA CANTUUGEEN BARUUR, BAAHI CIIRSANIYE.
CADIINTA IYO GUDURKII INTUU, UURKA KA CALEEYO.
CAWEYS UGUMA BAAQEEN DUGAAG, KII MAQNAA CIDA'E.
CAATADA WARAABII AHAA, MA CAYILEEN WIIGE.
CAAWIMO KUUMA DIIDEEN CISMAAN, CAADILKII BOQORE.
CADKA JIIDHKU WAA NIXI LAHAA, KUMA CADAADSHEENE.
DAGAAL KUGUMA CURIYEEN ADOO, SOO CALAACALAYE.
GOORTAAD RAGAAGII CUNTUU, KAA CALOOL GO'AYE.
CAAQIIBO UMA AAD GASHEEN, MANA CISEYSEENE.
ISBA WAA KU CAABIYEY TOLIMO, KUMA CANEYNEYNE.
NIN ~~XX~~ CAWAAQIBKIISA AN KA TALIN, CAADO WOW TAHAYE.
CIDHIB XUMADI AAD DHIGATAY BAAD, CAAWA KULANTEENE.
CAQLI HADDII ADLEEDAHAY CODKAA, ~~XXXX~~ KUMA DHAWAAQDEENE.
NINA MAYDIN CAABUDAN KHALQIGA, COOMIR IYO SHIIKHE.
CATAABKA ISKA DAA INAN RAG, WAA KII CALOOL ADAGE.
KELYANA CIIRSO GEERIDA, MARBAAD CALAFSANAYSAAYE.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE XASAN OO UGAGA JAWAABAYEY CILMI CARAB CABDI MAANSADA KU QORAN BOGGA 55AAD EE KA MIDA GABAYADII KOWAAD. DABADEEDNA WUXU YIDHI;

WAAYEEL KAFTAMAY ODAYADAA, CEEBTA KALA WAAYEY.
WALAALAHA IS JECEL AAN WOQOOD, GEES U KALA WEECAN.
WAYS WEHESHANAAYAAN HALKIYO, WAAGA AAKHIRO'E.
RAB U WEERAN BAA JIRA INAY, MAR IS WAREEMAANE.
HA YEESHEE WASWAAS INU DHEX GALO, HOREBA LOO WAAYE.
HA WAREERIN CAAQYOHOW NABIIB, KAMA WAR QAATAANE.
WADADA TOOSAN NIMANKAA YAQAAN, EEBBANA U WAANSHEY.
WACDINA QAATAY WAA NIMAN KA HELAY, WAALIDKOOD DUCO'E.
WALKADAAD ADUUN NIMAN BARTOO, WAAYO ARAGOOBEY.
HA WAREERIN CAAQYOHOW NABIIB , KAMA WAR QAATAANE.
WADAAD MUUMINIYO WAXA KU BADAN, CULIMO WAAWEYNE.
WELIYADA KU JIRA BAA KA BADAN, WEEDHA AADMIGA'E.
WAXYIGII ILLAAH SOO ROGIYO, SHIINKA IYO WOWGA.
XADIISKII RASUUL LAGA WERSHIYO, WAAJIBKAY GARANE.
WERDIGII ADOOGOOD AKHRIYEY BAY, WADAAN WELIYE.
HA WAREERIN CAAQYOHOW NABIIB, KAMA WAR QAATAANE.
WANAAG BAA DHEX YAAL IYO TOLIMO, WAQAY KU WAARAANE.
WELWEL KAMA QABAA TALO HADDAY, WABARO GOOYAANE.
WIIL YARI HADDUU HELO RA'YIGA, KAMA WALAACAANE.
WAXAAD GABAYGA ULA JEEDO IYO, SUN IYO WAABAYDA.
WAA NIMAN YAQAAN HADALADAAD, SOO WERIDAYSAANE.
HA WAREERIN CAAQYOHOW NABIIB, KAMA WAR QAATAANE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CILMI CARAB CABDI

CILMI WUXUU MAANSADAN UGU FAANAYEY
ISMAACIIL MIRE OO AY ISU GABYI JIREEN
DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

ASHAHAAD LA QIRO IYO QURAAN, AAYADAHA DIINTA.
ALEYLKII SALAAD LOO KICIYO, AAYADAHA DIINTA.
AGOON LOO GARGAARIYO MISKIIN, UURKU GUBANAAYO.
AMASE KII ITAAL DARAN KHALQIGA, OOMATINA WAAYEY.
OQOONTII ILLAAH IYO HADDII AY, SHARCI AHAATO.
MA OGTAHAY ISMAACIIL MIROW, KAA ISLAAMSANIYE.
HADDII OOSHA REER CALI TOLKAY, LAYS AF GARAN WAAYO.
AMAAN LAYSA SIIYIYO HADDAY, NABADI IIMOWDO.
ODAYADIYO GUURTIDU HADDAY, EEDDA DAMINWEYDO.
ERAY QAADAN WAAYIYO HADDII, AY AFXUMO RAAGTO.
NINBA WUXU AWOOD LEEYUHUU, URURSANDOONAAYE.
GOORAY AHAATABA DAGAAL, LOO ALAAB GURAYE.
ASARAARKU WAA INU HADHAA, DIRIR LA OOGAAYE.
AFDIINLUHU MARKII UU QARXIYO, OLOLE MAADHIINKU.
AWAARIHIYO SIIGADA MARKII, QIIQU INA AWDO.
AFKA QORIGU GOORTUU GUBTEE, DHAMAC U EEKAADO.
IKHYAAR MEYDA GOORTII BUNTUKHA, LAGA AG QAADAAYO.
AYAA HEBEL LAHAAYEY MARKII, LA ISKU UUGAAMO.
ARGAGAXA MARKAASAA FULUU, OODDA JEBIYAAYE.
GEESIGA ADKAYSTAA LIB HELA, AARKA DHIIDHIYA'E.
AYAANTAA RAG WAA KALA HADHAA, AADNA LOO BARAYE.
MA OGTAHAY INAANAD INA MIROW , II DHIGMAYN ANIGA.
ABEER RIMAYI KII DHAQAY HADDAY, BAADI KA AHAATO.
IYADOO GUYAAL BADAN MAQNAYD, OO MID KALE IIBSHEY.
XAQLIHII OQOONSADAY HADDII, HOO LA ODHANWAAYO.
AASAASAN MURA OO GUDAY, URURIN DOONAANE.
GAR LA OOGEY ODAYAAL LA GURAY, XAAJO KU ADKAATAY.
MA OG TAHAY IN LAY YEEDHAYAANAD, ILA EKAYNAYNIN.
ABAAR RAAGTEY JIILAALKA ADAG , ROOBNA IMAN WAAYEY.
ANIGAAN ANFACO HAYSAN KALE, IBINA DHIIQAYNIN.
ABIIDKOOD MARTIDU KUMA QADAAN, OODAN JIIFSADAYE.
ADNA WAXA LAGAA SHEEGAN JIREY, EED DHABCAAL NIMO'E.
MA OGTAHAY INAANAD INA MIROW , ILA EKAYNAYNIN.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY SAYID MAXAMED CABDULLE

WUXUU UGU DHAARANAYEY SOOMAALIDII KASOO HORJEEDEY
EE GAALADA RAACSANAYD, DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

| | |
|---|---|
| XUSEENOW IKHWAAN BAYNU NAHAY, | UUR KASOO BAXAYE. |
| ALLAA IGU OG OO WAA JECLAHAY, | AYNIGAAD TAHAYE. |
| ARDAY IYO SIDII MACALIN BAAN , | KUU AF BARAYAAYE. |
| AFAR HALAAN LA ALALAADAY, MAAN | ADIGA KUU SHEEGO. |
| HADDAYNAAN MAJEERTEEN SIDII ADHI, | U IIDEYNIN. |
| ARARSAMIYO IIDOOR HADDAAN, | IDHANKA LOO QAADIN. |
| HADDAYNAAN IRBAHA DHEER KA JARIN, | EYDA REER HAGARA. |
| BULAXAAR AGTEEDIYO HADDAAN, | AWDAL LAGA YAACIN. |
| AWLAXA HADDII AAN LA GELIN NIMAN, | OGAADEENA. |
| OLOLAHA COLKAAN WADO HADDAAN, | LALA ASHAATOOBIN. |
| AJIGA WAAMO YAALOW HADDAAN, | WAR IDIN SOO GAADHIN. |
| NIN ISLAAMKA CAASIYEY HADDAANAN, | AABE KAGA YEEDHIN. |
| ODHAAH KII XUMAAN JIREY HADDAANU, | EEDIN TALADIISA. |
| JIDKA ADARI LOO MARO HADDAAN, | LAGA UGAADHOOBIN. |
| MEESHA IYO IIMEY HADDAANAN, | WEERAR KU EKAYNIN. |
| OORYAHA AMXAARADU HADDAANAY, | CADAN KA AWLEYNIN. |
| IGAAR IYO KUWUU DHALAY HADDAANAN, | WADA UNUUN GOYNIN. |
| ALAYLEHE ISLAAM BAAN IHIYO, | AHABTU WAA BEENE. |

WAÀ DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY GOOX CILMI

NIMAN RAG LAGA LAAYEY OO HORE U
AARSAN WAAYEY AYUU KU GUUBAABINAYEY
DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

INDHOWEYD COD GABAY WAANIGII, CAAJIS KA AHAAYE.
WAATII AN CAASIYEY BERYAHAN, MANA CISEYNEYNE.
AN CADDEEYO CAAWOO KALAA, LAGU CAWEEYAAYE.
CURADKII ISMAACIIL DHALIYO, CALIBA GEERYOOYE.
CISMAAN MAXAMED WAATAAD GOD SHALAY, KAGA CAROWDEENE.
IYADAAN CAARA DHUUB LOOLA IMAN , CADOW KU LIISHAAMAY.
CIDLAA MAWD KA HELAYAA NAFTAAD, LA CABSANAYSAANE.
DHAAXAA DARAAN CIDINA DILIN , CIIDDA HOOS MARAYE.
CAAWA INAY GO'AYSIYO INAY, WAAYO SII CUNAYSO
NIN KALOO CADAYN KARA LA WAA, CAADILKAA GARANE.
HADDII UU CADDAAN IYO MADOW, UUNKU LA COLOOBO.
CALAFKIISA OO AAN KA MADHAN, DUNIDA COONKEEDA.
HALKII LOO CALAAMADAY HADII, AAN CIMRIGU GAADHIN.
OO AAN CIRSHIGA AMAR KA IMAN, KAAMA GO'O CEESHE.
CALOW LAMA DUGSADO XAAJADII, KUUGU SUGAN CEEBE.
CUDUD IYO ADOO XOOGLE BAAD, CUDUR LA JIIFTAAYE.
CAAFIMAADKU WUXU SAARAN YAHAY, CAARRADDII WARANE.
MARUUN MAAD CADHOOTAAN, RAG WAA LAYSKA CELIYAAYE.

WAA DHANAYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY WARSAME DIIRIYE. WUXUUNA KULA DARDAARMAYEY GABADH UU DHALAY OO UU KU WAANINAYEY, WUXUUNA YIDHI;

KAAHAY KACAANTAYE HADDAAD , KOR U YAR DHEERAATO.
UU MAWDKU KUU KAADIYAAD, YARA KORTOO NAAXDO.
KOLEY WAA HUBAAL INAD GEYAAN , BADAN KULMAYSAANE.
KICI WAA GABOW BAY HAYOO, KUUDUD BAAN AHAYE.
KA CAD MADAXA TIMIHII BAFTADA, CARABTU KEENAANE.
KAABIGA WEDBAA IGU HAYIYO, SHAYGI KULULAAYE.
KODADAAN U SAARAHAY QABRIGA, LAY KAXAYN RABO'E.
AAN KULA BALAMO WAA INTOO , LAYGA KAA WADO'E.
KOHAN MAYSID TALO WAALID IYO, KII DAD KUU XIGA'E.
WAXAY KULA RABAAN INAD KHALQIGA, UGU KORAYSAAYE.
OO AY KU KUUNYAAN HABLAHA, QAAR KUFKAA IHIYE.
HADDAYS KAARAHDAAN KHAYRKA, WAAD KALA TEGEYSAANE.
KALGACAYL HADDAY KUU QABAAN, KAALMO WAAD HELIYE.
KASHA MAALINTAAD GELISO GUUR, KELI HA XAAJOONE.
KURTIIN WADA TASHADA WAA IYAGA, WAXA KU KAABAAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIBEY

DIIRIYE NAALEEYE.

DIIRIYE; WAXAA USOO HOYDEY NIMAN KA MIDA RAGII AY XIDIDKA AHAAYEEN, MARKAASAANU U LOOGIN. HASE AHAATEE XMXX TAMARTIISII AYUU SOORYEEYEY. MARKII AY GURYOHOODII TAGEEN AYEY KA CAWDEEN. MARKAASUU MAANSADAN TIRIYEY ISAGOO KU HAL QABSANAYEY HAWEENTIISII WUXUUNA YIDHI;

DAHABOY HADDAAN DELEB LISIYO, DEEQA IYO HEESA.
DIRKEEDII MADIIXNA AN KU DARAY, DAAWAD IYO HAYBAD.
OO WELIBA SHAAH IYO XAWAASH, AAN DABKA U SAARAY.
DUMARKUNA BARIISKII KARSHEEN, DAHAB LA SOO SIIYEY.
OO AY DUL HEEHAABAYEEN, SIXINI WAA DOOGE.
JEERUU ILKAA DARIB LA DHACO, AWLALANA DIIRO.
MA DULMIYINE XIDIDKAY WAXBAAN, DEEQIN WELIGIIYE.
DAREEN WEEYE HILIBUUN HADDAY, NIMANKU DOONAANE.
WAA LOO DIGAA NIMAN HADDAY , DAW XUN MARAYAANE.
DADNA ADIGA WAA KUU XIGAAN, DAAHIR IYO NUURE.
DEELQAAFKA WAA LAGA QABTAA, KAAD KA DIIR NIXIYE.
NIN DULQAAD YAQAAN BAAN AHAAN, DIIRIN WELIGIIYE.
DAR KALAAN KA BAQAYAA INAY, DAF U YIDHAAHDAANE.
DENBI IGA FOG BAAD DOONEYSAAN, INAY DUL KEENTAANE.
DADKA DURUGSAN IYO WAY OGYIIN, KAANU DERISNAAYE.
OO DEEQSINIMO WAY QIRAAN, DIR IYO DAAROODE.
DAAYIN INAD KA YAABTIYO HADDAAD, DAACAD U HADLAYSO.
DADKU IMA XANTOO WAAD OGTAHAY, DANISE YEELKEEDE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CABDI JAAMAC CALI

CABDI WUXUU MAANSADAN KAGA CABANAYEY
HAWEENTIISII OO KU XUMAATAY ISAGOO MARKII
UU FURAYEY KU SII SAAGOOTIYEY GABAYGAN
DABADEEDNA WUXU YIDHI;

INKASTUU NIMCADA EEBBEHEEN, JAQAYO OO NUUGO.
MA NOOLAADO NAAG XUMI NIMAY , NABAR KU HAYSAAYE.
NIYADAAN KA DILANOO QALBIGA, DAMISAY NUURKIIYE.
NAFAQADANA MA AN QAATO IYO, NUXURKA SOOREEDE.
NABAD KUMA AN SEEXDIYO HABEEN, NAALADII FARAXE.
NACAB IGU NAGAADAAD TAHOO, LURAY NAFTAYDIIYE.
NUGAAL KAMA AN WAAYEEN MIDAAN, IGU SHIDAYN NAARE.
WAXAAN UGA NABNAHAY MOOYI WAA, LAY NASAKHAY SHOWE.
NASIIBKAA XUMAADAA WUXUU KAA, DHIGAA NACASE.
NABAADKAA KA BADAN IYO HABLUHU, NAQA CALEEMEEDE.
NEFISIMAAYO JEEROY INDHUHU KAA, NASTAAN ADIYE.
NABSI BAAN SUGAAYOO MIDKAAN, NAAWILAA YIMIYE.
NAXLI AD IGU BEERTIYO WAXAY ,GALAY NECAYBKAAYE.
NAFSADII ADAA DILEY KALGACAL, KUGULA NOOLEYDE
WAXBA ANIGA NAALEEYE IYO , NUUR HA II KORINNE.
NAXARIISTA EEBBIYO HA ARAG, NEBI SHAFEECIISE.
NAAR LAGU RIDYAHAY IGA CAROW, NACAY AGJOOGAAYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY XXXX CABDI FADAL
OO FARASKIISII UGU MANA SHEEGANAYEY WUXUUNA
YIDHI;

| | |
|---|---|
| LUR MIYAANAD ARAG MAYDALOW, | WAXA DAD LEELEELAY. |
| WELI CEEL MIYAAN LAGUGU LABIN, | ADIGA OO LIICSAN. |
| LIX BILOOD MIYAAD HAAMIHII, | LAASIM KU AHAATAY. |
| MA MEEL DHAANKU LABA SOO DHAXAAN, | KUGU LADAABSIIYEY. |
| KORAMADA MIYAAN KUU LARBIYO, | LABACYADII KAARSHE. |
| MA SIDEED JIRBAAN KUU LEGDAAD, | LAACDAY BADHIDIISA. |
| LUBIGAAGA OO IDIL MIYAA WADA, | LADAADYOODAY. |
| FANKA LADAN LAFAA ADHAXDA IYO, | LAXAMKA HOOSEEYA. |
| SIDII AAR LAXAADSADAY MIYEY, | LUQUNTU KUU BAACDAY. |
| LA'MA'O DHIINA LOOL IYO XARIIR, | LAYSKU WADA LAAGAY. |
| LADHKA KUGUMA DAAYEE HURDADA, | MA ISKU KAY LOOHDAY. |
| LEGAX MIYAAN KU GELIYAA SIDII, | WELED AN LAAB RAACAY. |
| HASHA LOOLA LUUL IYO IDIIN , | SIDIGTA LAAN RAABI. |
| LISTA GEELA SUBIXII MIYAAN, | LEDANA KUU RAACSHEY. |
| LAFTA DHABAR KOB LAYSKAGA JABOO, | RAG ISKU LEELEELAY. |
| MAKU LALI HALKAAN MAYDALOW, | KUGU LISTAAMEEYO. |
| MISE WAAN KU LUMIYAA INTAAN, | LUR IGA KAA GAADHIN. |

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CALI JAAMAC HAABIIL
OO KAGA JAWAABAYEY GABAYGII SAYID MAXAMED
CABDULLE XASAN ISAGA KU CAAYEY. DABADEEDNA
WUXUU YIDHI;

HAWRAARTA GABAY WAAYADEER, HAABKA KUMA HAYNE.
HIYIGAYGA WAATAAN KA JARAY, HIMILADIISIIYE.
MA HIRGELIYO MAANSOOYINKII, AAN HABAYN JIRAYE.
HURDADUU XALAY IIGU YIMI, GOOR HABEEN BADHAHE.
HA'DA BAL AN KA DAYO WAA, MURTIDU TII AN HAYN JIRAYE.
HADDAAD KU HAMIDOO DAMACDO, OO TALO KU SOO HOYSO.
HAGARDAAMO AADANE INAANAD, DIB UGU HAWSHOONIN.
HABAAR QABE MID SHAYDAAN WATAAN, KAA HADHAYN ADIYE.
HAL YAROO SU'AAL IYO JAWAABAAN, IDIN HALEELSIINE.
HAYE DHAHA DHEGEYSTOO WARKANA, HOOYA NAGA GEEYA.
HADHUUDHKABA HADDAAN LAGA HUFINOO, CIIDDA LAGA HAADIN.
HALAL DHAGAXA KAMA WEYDID AAD , GAWSKA KU HESHAAYE.
HADDII GEED HADH WEYN LEEYOHOO, UU HADHSADO MAALKU
AAN HOGOSHA ROOB QABAN IN BADAN, HADHACNA UU YEESHO;
HABAAS LAGAMA WAAYIYO KUDKUDE, BOODH KU HOOS JIRA'E.
U HAGAAGTAYAA IYO HALAAG, QOORTA GELIYAABA.
NIN HABAABAY MEESHUU QABTAA, WAA ALLA HORTIISE.
HORTAADAA BANAAN NIN U MXXXXXX SOCDAA, CEEBTA HURIWAAYE.
HALIS WEEYE WAAYEEL SIDUU DOONO, U HADLAAYE.
HAWLAHA HAWEENKIYO RAGGAA, LAGU HUBSHAA TAASE.
HABLAHAA CADDAYN KARA HADDAAD, YARE HESHIISAANE.
HUBKA DUMAR MIYUU LEEYAHAAN, HOYGA KULA SEEXDAY.
MA HUGAAN KA DHIGAY AAN AROOS, SHIN ULA HAASAAWAY.
MA HAWEYNEYDII AAN QABAA, HOOGE LAGA YAABYE.
HOLOQ DHEERIDAYDIYO SIDUU, KU ARKAY HOOSTAYDA.
HADAL ILEEN LAFAA LAGAMA GURO, HOREBA LOO SHEEGYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY
BURAALE CUNA WEYNE.

BURAALE, WAXAA LAGA DHACAY GEELII BEESHOODA OO DHAN. MARKAASUU MAANSADAN JIIFTADA AH OO UU XIGAALKIINA KU LEEYAHAY GEELII NALA SOO DHICIYA NIMANKII GEELA KA DHACAYNA KU HABAARAYO TIRIYEY

DABADEEONA WUXUU YIDHI;

QAYLADU RUN WEEYAAN, RAGGA HABAR XABUUSHOW'E.
AXMED FAARAX RUUNKIIS, RUDUC BAAN U LEEYAHAY.
NIMANKII NA RAXANRAADSHEYNA, RUDUC BAAN U LEEYAHAY.
RANBAG IYO CIBRAANKIYO, NINABA REEBIMAAYO'E.
REER DAAHIROW IDINKU RAGA KALE, HA JOOGEE.
ABTIRSIINYO RIINGALA , INAGAYSKU, RAACNAYE.
AMA REERKA NAGA SOORA RIGRIGADA, BARUURTA AH.
AMA REENKA NAGA DAAYA, RUN U QAADAN MAYNO'E.
AMA ROORA NAGA TAGA KALA , RAYSAN MAYNO'E.
AMA RAADKA NALA GURA, RABBI WUXU KA QAYBSHABA.

AXMED FAARAX RUUNKINA, RUDUC BAAN U LEEYAHAY.
WARMA AAN LA RIDAHAYN, HALA WADA RAKOOCINE.
FARDO AAN LA ROGAHAYN, HAKU WADA RARAANINE.
KACA LIBINTA RAADSADA, RAGU SIDIINA MAAHA'E.

NIMANKII NA RAXANRAADSHEYNA, RUDUC BAAN U LEEYAHAY7.
REERII LA DHICI RABO ODAYOW, RUBAASHA'E.
ODAYADA RUBAASHANA, FAAL BOW RIXLEEYA'E.
AWRTAA LA RARAYANA , RUGTA KAMA DAREERTO'E.
FURUQ IDINKU REEDAAD, RAGGA IYO HAWEENKABA.
ROOB IDINMA DOOJOO, RUG ABAARA WADA DEGA.
FARAS ROORI WAAYOO, ROQO WEYDA WADA NOQOY.

WAA DHANYAHAY

WAXAA LA SHEEGAY WAKHTIGII UU GABYEY MAR IN YARI KA DANBEYSEY IN DADKII FURUQ KU SEEXDAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CABDI FADAL.

CABDI FADAL WUXUU MAANSADAN KULA HADLAYEY FARASKIISII OO UU UGU MANA SHEEGANAYEY. DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

MIDABKAAGU GEYDHOW ,
SIDII GORAY MA LAACEENE.
GARBAHA IYO FEEDHUHU,
BARUUR KUMA GAMUURMEENE.
GUUDKAAGU SIDA GAARI DUMAR,
GEDEF MA YEESHEENE.
GUDGUDAHA HABEENKII HADDII,
GORAY LA RAACDEEYO.
HADBA GEESTA KAALAMA DAYDEEN,
GALANGAL LAYDHEEDE.
CIR GABDHAMEY GUFAACIYO HADDUU,
GALABBA CAYN KEENO.
GAMAANKOO CIDLADA LAGAGA TEGEY,
GEYDHA IYO ROOBKA.
MIN LA GOODEY GAARIDU HALKAY,
ANIGA II GOYSEY.
LEGGA KUGUMA GELIYEEN,
KOBTAY GOGOSHU II TIILE.
LABADAADA GOBOL GOOR ALLABA,
SUBAG MA GAADHEENE.
GOONYAHA INTII KAA DA'DAA,
GEGI MA QOYSEENE.
SIDII GABANO AAN DHALAY WAXAAN,
GURADA KUU SEEXSHEY.
GADH MADOOBE COLI MAALINTUU,
GEELA LA CARAABO.
INAANAD GAABIN AAD GURUBSATAA,
KII AD GAADHABA'E.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY QAMAAN BULXAN.

QAMAAN NAAGTIISII OO KU MAQNAYD CIDOODII AYAA LAGA FASAQAY ISAGOO AAN OGEYN. MARKII UU OGAADEY IN NAAGTII LAGA FASAQAY, AYUU AADEY MARKAASUU U TEGEY NAAGTII OO NIN KALE QABO. MARKII UU KASOO NOQDAY AYUU MAANSADAN TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

ANAAN MARANTIDAYDII DACNIYIN, MEEL FOGNA AN JOOGIN.
ANOO SHALAY MINKOODII TEGOO, GAADHI KARA MOOGA.
MUSLINOW BAL MAQAL XAAJADAA, LAYSKU MALAQ SIIYEY.
CULIMADII MARTIDA LOO AHAA, MUXIBADDII DIINTA.
HADDII LAGU MOHOOBIYEY HAWEEN, MILILIG DUULAANA.
MUSLINOW BAL MAQAL XAAJADAA, LAYSKU MALAQSIIYEY.
HADDUU MAROORO LAMA TOOSIN KARO, MACALIN KAAGIIYE.
MUFTI SHEEKHA YAA IGA FASAQAY, MAALIGII DHALAYE.
MUSLINOW BAL MAQAL XAAJADAA, LAYSKU MALAQSIIYEY.
INTAAN MADAXA REER MAGAN WARFAA, MAGUCU DUUGOOBIN.
MAADHIINKA BUUXIYO INTAY , MIDIGTU LAAB MAYSO.
RABBI BOW MAKHRAATIYA INAY, MAAR LA DHICI NOOLE.
MAAG ANAN ABIIDKAY SAMRAYN, LAYGU MAAMULAYE.
MUSLINOW BAL MAQAL XAAJADAA, LAYSKU MALAQSIIYEY.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY QAMAAN BULXAN.

QAMAAN WUXUU AHAA RAGII KA SOO HOR JEEDI JIREY SAYID MAXAMED, MAALINTII DANBE AYUU KU TASHADAY INUU SAYIDKA LA HESHIIYO. MARKII UU SAYIDKII U TEGEY AYUU MAANSADAN OO UU SAYIDKA CALOOL FAYOOBI KAGA CODSANAYEY TIRIYEY DABADEEDNA

WUXUU YIDHI;

FARDAA SIIGA BAROORKA OO
MAR LA SAARAY MADOWGA OO
MAR LA SAARAY CADDAANKA OO
UGU SAAMI KOREEYA,
SAYIDI YAAN LA ISIIN.

GEELA SOOBIR DHALAYSA OO
QASKA LOO SUMADEEYEY OO
MIDKAAN SUUNKA KU HAYNO'OO
SAARANAYNO CARUURTIYO,
MIDDA LOO SADDEXEEYEYEE,
UGU SAAMI KOREYSA,
SAYIDI YAAN LA ISIIN.

NAAGO SAWJAD WANAAGSANOO,
SAFKA REER XASAN NUURAHOO,
SALI KUU HOR GOGLEYSA OO,
TUKANEYSA SALAADDA OO
UGU SAAMI KORAYSA,
SAYIDI YAAN LA ISIIN.

LO'DA QAALIN SARGOYNA OO
SAWIRKII LAGA DHEEGAYOO,
SUUL DHABAALE SUGEYSA OO
BARQO SAAKA DAREERTAY BAA
UGU SAAMI KORAYSA'E
SAYIDI YAAN LA ISIIN.

DHARKA KHAYLIDA SAAXIL
OO XIDAAYAD LA SAARAY BAA
UGU SAAMI KORAYSA'E
SAYIDI YAAN LA ISIIN.
SALAANTAADIYO JAAHIYO
SAWDKA KAA IMANAAYA
INAANAAN SEERE LAHAANIN OO

## MAANSADAN WAXAA TIRIYEY CALI JAAMAC HAABIIL

CALI WUXUU KA MID AHAA RAGGII CUQAASHA
AHAA EE SAYIDKA KASOO HOR JEEDEY LANA
SOCDEY GUMEYSTIHII INGIRIISKA DABADEEDNA
WUXUU TIRIYEY MAANSADAN OO UU KU KALA ERYAYEY
DARAAWIISHTII DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

WAATAAN KA TEGEY MAANSADAAD, IGU TUHMEYSEENE.
MARKII TIX IYO WIIL LOO HELAAN, TAYDI GAABSADAYE.
WAA IGA TARDHEEYEEN HALKII, MALABKU TUURAAYE.
TOGAGAAN KASOO QAADI JIREY, TAAR AN KAGA KEENO.
WADAADKA AAN TUMAATIYO MURTAAD, IGU TILMAANTEENE.
TAWRAAD INGIIN IYO FURQAAN, MIDIBA WAA TOYE.
TOOLMOONIHII MAXAMED BOW TEGEY, ILLAAHEENE.
TANBIIHUU NA FARAY LOOXYADAY, NOOGU TAAL WELIYE.
WAA TIIR AN NAGA LIICAHAYN, TAANU LEENAHAYE.
TALADII ILLAAHAY KA QAAD, TUUGI REER XAMARE.
TODOBUU QABAA NAAGO XORA, TUU FALAA DARANE.
KUN TAWXIIDSANAAYUU SIDII, TEYS U GAWRACAYE.
SAFARNA WAA LA TAAKULIN JIREE, LAMA TAHDIIDEYNE.
ISNA TURUQYADUUN BUU JARAA, TIMIRTA RIIXDAAYE.
TAAG NIMAN LAHAYN IYO AGOON BUU, KA TAAJIRAYE.
TACABKII BE WAA SIDA FIRCOON , TAB IYO XEESHIISE.
MA TALYAANIGAASAA MAHDIYA, TANINA WAA YAABE.
ARARSAME MA TOOCSADO FARDAHA, TAKHANTAKHOODIIYE.
BARKADKII TUMAATIDA CADDAA, TUHUNKI BEENOWYE.
MAXAMUUD GARAAD TUKHUNTUKHUU, WELI LA TAAHAAYE.
TIIR LAGUMA OGA BAHARARSAME, TAHARA WEYNTIIYE.
TAFANTOOFE NIMANKII NUGAAL, TEYSE KU AHAAYE.
GARAADKAY TUMAALUHU DILEEN, TAAWISHAA DARANE.
TOLKOOD NIMANKA IIBSADEY ILLAAH, TACABKI WUU SIINE.
TAWSTU CALI GERUUN BAY KU HADHI, TAN IYO XAATAAYE.
TALAATIINKA RAMADAAN NINKII, IDIN TAKLIIFAAYEY.
TAWXIIDKA EEBBIYO SHARCIGA, IDIN TARAASIIYEY.
TAWDII HOREETABA ISAAQ WUU, LA TOOGTAMAYE.
HADDII TEERIGII IDINKU DHACAY, NALAGU TAAMAAYEY.
TUNKA KA LEEFA DHIIGIYO ILMADA, IDINKA TIIXAYSA.
HADDABA TOOGA BAXA WAA JANADA, TALALAXDEEDIIYE.
TUREECADA DAY WAATAAD KUFRIGA, NAGU TILMAANTEENE.
HA TARGAAFO SIDA TOOJO GEEL, TUURIN BOW QORANE.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY

QAMAAN BULXAN.

QAMAAN WUXUU ERGO UGU TEGEY NIMAN GEEL KA QAADAY ISAGOO WEYDIISANAYEY INAY SOO CELIYAAN GEELII AY QAADEEN. MARKAASAY HADALADIISII GARAYSAN WAAYEEN OO KA BMX DHEGA ADAYGEEN. MARKAASUU MAANSADAN OO UU KU TUSAALAYNAYO SIDA UU NABSIGU U WAREEGAYO TIRIYEY DABADEEDNA WAXA UU YIDHI;

WAX LA SIIYO AADMIGA NINBOW, SADAQAD ROONAAYE.
MUSLIM IYO KUFRIBA WOW SITAYE, SAANCAD BAA HELAYE.
NINA LAMA SINAADEEN HADDUU, SAGANTA DAAYAAYE.
ISBA CAAWA SAYLIYO IDIIN, LAGA SALAAMEEYE.
SEEDLEY MA FOOFSADO NINKII, SAAN OGAA QABAYE.
SULI WEEYE REER NUUR WIXII, LAGU SARSEERAAYE.
SAREEDOY BA' SAA MAXAMED BAAN, AXAD SIN TAAGNEYNE.
SAFKA GAADHKA LABADII SERJIYO, SUR IYO QAARKEEDA.
IYO SINAHA KII MEEL LA HELA, SAHAL U GAASH GAASHKA.
SURAXAADKA LABADII INDHOOD, SELELEY DAAROODKU.
SOOMAALI KAMA KOOF SINAYN, INAY SALAAMAANE.
GIIB IYO SARKAALUU LAHAA, SARAC HA QUUSTEENE.
SADDEX TOBANLE WADA SAAFIYAA, SHAR U SAFAYSNAAYE.
SUNA LAGAMA RIDIN MEESHU YIIL, MAGAC SAGAALOWE.
WAXA SAMAY LA QAADIYO DAGAAL, SUBIXI LOO WAAYEY.
SIRQAAN GARANE SOOFKUU HAYAAN, SED UGU LAABNEYNE.
SODON BAA DORAAD LAGAGA YIMI, SAADADUU WADAYE.
SALKA MEELU DHIGO WAA LA'AA, SOCOTO MOOYZANE.
SUGUDNA WAA U WEEL LAMANA TEGIN, SABASHO XOOLAADE.
HADDAY SIGATO GOBI WAA KACDAA, AMASE SUUXDAAYE.
SURYO KUMA BAKHTIDO MAALINTII, LAGA SAREEYAAYE.
WAA SEBEN SOKEEYIYO XIGAAL, WAXAY SIN TAALAAYE.
SIDII SEBIGI SAALADA QOFKUU, SUGAYEY GAADHSIIYEY.
WAXAD SEERA DHAAF TAHAY HADDAAD , SUDHATO EED WEYNE.
SED U DHIGO ISAAQOW NABSIGU, KAAMA SOOMANA'E.
SOOFKANA BADH CELI WAA ARKAA, SAAD U GAALIBIYE.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY
CABDULLAAHI DUCAALE.

CABDULLAAHI, WAXAA LAGA LAAYEY RAG AY
AY WADA DHASHEEN, MARKAASUU ISAGOO AAN WELI AARSAN
MAANSADAN TIRIYEY ISAGOO KAGA WARAMAYEY,
CIILKA IYO UURKUTAALADA UU QABO, DABADEEDNA
WUXUU YIDHI;

HA'DA MAANSO WAAYADANBA WAA , KALA HARAADNAYNE.
HAASAAWIHIISIYO KA TEGEY, HOGA TUSKIISIIYE.
INDHOWEYD HABANE DIIRIYOW, KUMA HALOOSEYNE.
HIYIGEYGA WAATAAN KA JARAY, HIMILADIISIIYE.
HAYEESHEE, XALAAN LEYLKI DHEXE, HAW LASOO IDHIYE.
IGA HOOYA WAAYADANBA WAA, IIHANDANEYSEENE.
HILIMADA AN GARAN WAAYEY AAN, MARIN HABAABAAYO.
HIIRTAANYADAAN QABO NAFTEER, HIIHDA DAMIN WEYDEY.
HULAABTAAN KU JIRO IYO TASHIGA, AAN HURDADA DIIDEY.
HIINRAAGA FEEDHAHA QALBIGAN, HALOWGU LEEFAAYO.
HIBASHADATAN IGU RAAGTEY IYO, HAARTA IGU TAALLA.
HAMIGIYO QAMIGA LAY GESHIYO, FOOROR HOGAD KAYGA.
HADBA WAXAN HIGOONAAYO CADHO, AAN HADHGELI WAAYEY.
HAASAAWAHAAN DAAYEY IYO , HADALKA LAY DIIDEY.
HADBA WAXAN FARUURYAHA ILKAHA, HILIB KUSOO GOOYEY.
HAYIN NIMADA SIDA LAY RARIYO, HEERYADA ISAARAN.
HAWEENKA IGU OOYAAYA IYO, GEESIYADA HOOBTAY.
IYO HEESTA IYO JIIBKA UU, HIIRAD TUMANAAYO.
WAA LABA HAB OO KALA FOG AAN, HAAB ISU LAHAYNE.
MARUUN BAAN HAWADA GAADHAYAA, WAAN HIGSANAYAAYE.
KOL HADDAAN HALEELANA RAGBAA, HOOS U SOO DEGIYE.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY WEERAR BULXAN.

WAXAA JIRTEY IN WEERAR NIN KU YIDHI WAXAAN KU SIINAYAA FARAS EE SOO DOONO AMA CID USOO DIRSO. MAALINTII DANBUU NIN U KACAYEY MEESHII UU DEGANAA NINKII FARASKA UGU BALAN QAADAY ARKAY NINKII BUU YIDHI FARSKII IIGASOO KAXAY, MARKAASUU MAANSADAN OO UU FARASKA UU JECELYAHAY MIDABKIISA KU TILMAAMAYO TIRIYEY ISAGOO NINKII SII FARAYA. DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

AXMEDOW AROORTAAD U KICI, OOGADII MUDUGE.
ADUUN BAA SIBRAARKA U ASLADAY, IDHAN MAJEERTEENE.
DADBA KALA ARJAASANE CIGAAL, MAALINTAAD ARAGTO.
MA IRDHAYSNA OO CAYNAB WAA, FARAS OGAADEENE.
WADAADKAA UBADA LOO SUDHAA, YAANU II IMAN DHE.

ASHKIR ORODKI WAA MAALINTUU, OOFO WEYNYAHAYE.
NIN OLOOLE BADAN BAAN AHAYE, YAANU II IMAN DHE.

HADDUU OOMO QAAJAHA NAFTAY, KALA ABAADAANE.
AROORKII MAQNAA KUMA SIMOB, YAANU II IMAN DHE.

MADAX ODAYG BULAALAAN KU NACAY, AAR HA BAYD JARO'E.
NIMAN URURA BUU KULA GALAA, YAANU II IMAN DHE.

NIN UGAADHSADAA XAMARKA JECEL, ERI DANBEED LOWE.
USHA IYO DHAWAAQUU SUGUYE, YAANU II IMANIN.

AFAR MIDABLE OOFTIYO FANKIYO , ADHAXDU WEYNAATEY.
ADIMADA MADOOBOW BAROOR UBAXA, BAAN DOORTAY.

WAA DHAN YAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY MAAX DACAR COLOW. MAAX WUXUU GABAYGAN UGU DHAARANAYEY SOOMAALI BADAN OO AY COLAADI KA DHEXEYSEY. DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

SUUGAANTA MAANSADA BERYAAN, SAABABEYN JIRAYE.
SAWIR IYO XARAAN BAAN NOQDAYO, WAAN SARRAAR GO'AYE.
SAABKAYGA HADALKII GALAY BAAN, SAHAL U YEEDHEYNE.
MEESHIYO SAQIIRNIMO RAGGII , LAGA SU'AALAAYEY.
EE SAANCADAALE U NOQDAAN, KAGA SAREEYAAYE.
INTAY SEEDAHAYGII KOGEEN, SAAMIYAA LUMAYE.
MARKUU EEBBAHAY II SAHLAAN, SADAR QALEEYAAYE.
WALLEE WAAN SUNEEYAA HADDAAN, LA I SAXIIRAYNE.
SEBEN KELIYA UUN BAAN ARLADA, SIIGA REEB DHIGIYE.
SARMA GOOYADAAN DHIGO HADDAAN, SAAXIL LAGA SHEEGIN.
SARKAALADA HADDAAN LOO WARAMIN, SALANSALXOODKAYGA.
SAFKA HABAR MAGAADLIYO HADDAAN, SAANACYADU QAYLIN.
SEERAAR HADDAAN LAGAGA MIRIN, SABADA BUUHOODLE.
OO SUUGYIHII MAXAMED WADEY, KALA SIFAALAYNIN.
SARIIRAHA UGAASKIYO HADDAAN , SULI LA WEYDAARIN.
SIBIDAA NABDEED IYO HADDAAN, SAGAL NALOO DHAAFIN.
OO REER SUBEYR WADA SUNAYN, SURINU JOOGAABA.
AMA SOOCA REER MUUMIN CALI, SIGIN DHARAAR NOOLBA.
ABASKUUL HADDAAN LAGU SAYIXIN, SAACAD IYO FIIDBA.
SEBENADAN HADDAAN REER BARTIRE, LAGAGA SOORYEYSAN.
SABUULADA QOTAAD IYO HADDAAN, SAAQA LAGU IIBSAN.
SOOMAALIYOO IDIL HADDAANAN, SIMIN DHAWAAQEEDA.
OO AANAN SIBAAD KAGA BELBELIN, SAMADA GUUDKEEDA.
ALAYLEHE SIDAAN MOODEY IYO, SAACAYAGU BEENE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY QAMAAN BULXAN.

QAMAAN WUXUU DOONAY XR GABADH MARKII
UU GABADHII U DADAB GALAY AYAA GABADHII
LOO SOO DIRAY SI AY U WADA HADLAAN MARKAASUU
MAANSADAN OO UU GABADHII KULA HADLAYO
TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI.

HADDAAN SIDIGNO GEELUBA LAWAA, INU SINAADAAYE.
SUD CALEENLE SABO DOOGLE WAA WADA, SUGAAYAAYE.
JEERAY MURKAHA SAANYADAAN, KALAMA SOOCMAANE.
SAAJAC WIILI WACALKII TOLKUU, KALA SAFEEYAAYE.
WUXUU SUMUCA DHEER IYO DABKIYO, SAMAYDA QAATAABA.
SIRQAY DOQONA SUUKAHA XUN BAA, SANACU RAACAAYE.
JEERAY SUN IYO QIIQ GALAAN, KALAMA SOOCMAANE.
DUMARKUNA SERBIDA JIIDHKA, WAA WADA SARKAAL WEYNE.
WAA WADA SURUUR ANAD GABAYN, SOOR GALKAA HORE'E.
NINA SAMAYADUU DHALAY LAWAA, INU SALUUGAAYE.
JEERAYDIN WADA SEEXATAAN, KALAMA SOOCMAANE.
SALAAMA'E BARNAAY NAAGO WAA, KALA SAREEYAANE.
WAA SIIQ INAAD GACANTA MIDIG, SIIQ KU LEEDAHAYE.
AANU SINAHA KAA DAAWANEE, SARAKAC OO JOOGSO.
HANA SELELIN NAAGTII XUN BAAN, SINO KU ROONAYNE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY QAMAAN BULXAN.

QAMAAN WAXAA DHACDAY IN IYAGOO RAG
FARA BADAN COLAADI KA DHEXAYSO UU
XX ARKAY LABA JILIB OO AY ISKU
CID AHAAYEEN OO GUDOHOODA KA COLOOBEY.
MARKAASUU LABADII JILIB WADA HADALSIIYEY.
MARKII UU LABADII JILIB HESHIISIIYEY AYUU
MAANSADAN TIRIYEY. DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

ANIGOO DHUKAAN IYO SIDII DHUGATO, — LAY OODAY.
DHULKA INAN KA JIITIYO ANAY , — DHIMASHO II JOOGTO.
DHADIG IYO LABOOD ANIGA OO, — KALA DHEX JOOGOODA.
OO DHEEFTA CUNI WAAYEY , — OO DHOGOR MADOOBAADEY.
MIYAAN DHUGAHA REER MAGAN WARFAA, — DHAAR U KALA QAADAY.
NIN DHIB GALAY WAXBUU UGU XISHAYE, — DHIBIBKA MAW AASAY.
DHAANDHAANKA TEGEY SOW BERBERA, — LAMA DHAQAALAYNIN.
SOW GAALKA DHOORKALI DADKII, — WAX UMA DHEERAYNIN.
SOW DHABANA HAYS IYO LA YAAB, — KAAN U DHIGAY MAAHA.
SOW HAATAN DHUUBKIYO MADADU, — IGU DHAMAAN MAYSO.

WAA DHAN YAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY
CALI DIIRIYE XASAN.

MARKII AY DARAAWIISHI BAABA'DAY OGAADEENA
LA DHACAY AYUU MAANSADAN CALI TIRIYEY ISAGOO
KU DIGANAYEY DAAROODKA. DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

QOSOLKAAN LA DHACAY IYO ILKAHAAN, DHAYDA KA CADDEEYEY.
DHAGDHAGTA IYO FARAXEER QALBIGU, DHAB U RIYAAQAAYO.
AAD DHAYGAGTEE LABADA SACAB, DHABANADII SAARTAY.
DHUL FOG BUU DHANBAAL IIGA YIMI, XALAYTO DHOOROWE.
BAL DHEGEYSO WAAKAAN WAX BADAN DHAWRAYAAN, HELAYE.
MEESHA IYO DHOODI IYO HAWD, DOOLO DHINACOODA.
DHEBIGIYO MADHEEDHKII DHULKAY, DHEBI KA DAAQAYSEY.
DHAQAAQILI MA JOOGTAA LA YIDHI, DHEGIHI DAAROODE.
KAYMII DHUYACA WEYN LAHAA, LAGA DHARAAR GUURYE.
DHIRBAAXOOYIN KULUL BAA KA RARAY, KAMA DHUL DOORTEENE.
DHAMAADAA LA YIDHI WIILASHII, DHIIRANAAN JIRAYE.
WAX LA YIDHI DHULBAHANTII MA HADHIN , SHAALE DHAWR BOQOLE.
WUXUU DHOGOR YAROW GEEL LAHAA, DHECE XIGAALKEENE.
INTII DHIMATAY MOOYIYE WIXII, HADHAYNA DHEERAAYE.
WAX LA YIDHI OGAADEENA DHAAF, DHOOBEY IYO LUUQE.
DHAAXAY WAX BADAN UUMIYAHA, KAGA DHAWAAJEENE.
OO AY DHECEEN OO KHALQIGA, DHIILA GELIYEENE.
ALAYLEHE BERINA AAN DHINTEE, IIDHAMAA SHARAFE.

WAA DHANYAHAY.

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY
KHALIIF FAARAX JAAMAC.

KHALIIF MAANSADAN WUXUU KU AMAANAYEY
GEELA SIDA UU U DHAQAALEEYANA WUU KAGA
WARAMAYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

IYADOO DIG IYO HAWD JIRTOO, DOOLO KU HARAADAY.
DALANDOOL HADDII AY WAX BADAN, DAWGA KU AHAATO.
DEGMADA OO ILAHA TAAL HADDII, MAALIN LAGU DAAYO.
HADDII YEEL DIYAAR LOOGA DHIGAY, DUHURKI LOO QAADO.
DIXDA XERADA GUULKA AH HADDII, DAAWAD LAGU DAAYO.
DILDILAACA WAA BERI HADDII, DEYRKA LAGA QAADO.
QORAXDOO MARKAA DEDAN HADDII, DELEB LASOO TAAGO.
DIREYSKAAN DHIGTAA OO MARKAA, CALAL YAR DUUBTAAYE.
MAANTAA ISHAAN UGA DARAA, UGA DANDAANSHAAYE.
MARKAY GACANI DAASHABA MIDBAAN, YAREHE DAASTAAYE.
DULA JEEDIS GOORTUU NOQDAAN, KALA DURDUURAAYE.
MANA DACAAMO CAANAHA HADDAY, IGU DURAANTAANE.
CASAR DIIQAY BAAN DUQAN DIDAYN, DOC UGU FAYLAAYE.
MARKAASAY DILAANTAA DHAMAAN WADA, DEKEYSAAYE.
HABEENKAA DADQALATAY TAGTAA, DARAYDA DHAADHEERE.
DIBJIRYO IYO INAY SAYDHANTAAN, DEEX KA TIRIYAAYE.
DUGAAG IYO RAGBAAN UGA SHIDAA, DOGOBO WAA WEYNE.
SIDII GAADH SARKAAL II DIRAAN, UGU DUL MEERAAYE.
MARKUU WAAGU IIDAALACAAN, KALA DAREERSHAAYE.
DAALKIYO HARRAADKIYO INTAY, DACASKA REEBEYSO.
TUURSUBAG DARKEEDAAN XERYAHA, UGA DUL OODAAYE.
MARKII UU DALDALO BAAN HALKAA, DIB UGA LAABAAYE.
DEYLIYO MIDUUN BAY TAGTAA, DOOXI BAAR TOGA'E.
HALKAASAY DIRAACDII KACDABA, INAMO DAAJAANE.
AY DIB UGA GUUSHAA ALOOS, DOOGA KA HOROOWE.
TODOB BOWGU DA'A GOOR LO'DIYO, ADHIGU DUUKHEENE.
MARKAASUU DURBAANSHAA RATIGU, DOOBTA CAARKA LEHE.
DEGEL UU TODOBA SOO GALUU, DEEX KU RIMIYAAYE.
WAA DAHABKA SOOMAALIYEED, DAHAB NIN HAYSTAAYE.
NINKAAN DAAYINKAY BELO KA GELIN, DUNIYAD WEEYAANE.
ISAGAA DUKAAN IYO KA WACAN, DOONYO LOOXYA AHE.
UDADAALA GEELII RAGOW , DUUNYO KALE DHAAFYE.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA ODHAN JIREY CABDULLAAHI DUCAALE.

CABDULLAAHI ISAGOO CIIL QABEY AYAA HABEENKII DANBE LOOSOO SHEEGAY NIN WEYN OO MAGAC DHEER IYO NIN DHALIIN YARO AHAA OO AY DILEEN NIMAN ISAGA LA DHASHAY. MARKAASUU MAANSADAN OO UU KU MUUJINAYEY SIDA UU UGU FARXAY NIMANKAA DILKOODA TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI.

WARKA XALAYTO AAN HELAY CABDOW, WAABERKA HORTIISA.
EE OY WADAADKIYO SIDEEN, WIIL YAR IYO NAAGI.
WAX BAY IGA XAYUUBSHEEN , KOLKII WEEYE AAN IDHIYE.
WAHABKA IGA QAAD IYO RUBCIGA, WEHE ISAARAAYE.
WELIGAABA WEYD IYO MA CUNIN, NEEF WARAAHSADAYE.
WAAYADAN ABAAR BAA JIRTIYO, WAHANKI JIILAALE.
WAATAAD HAMUUNTA U QABTEEN, WAAXYO GEEDA LEHE.
WAX LA YIDHI WAN WEYN BAA LA QALAY, WAXARKU YEELKIISE.
WADNAHAANAN SIINAYN BARUUR, JIIDHNA LAGA WAAYE.
WASLADAA KA HADHAY BAA LA YIDHI, WARAQYADIISIIYE.
IYAGAA WASIIRTIYO KU FILAN, WABARADAADIIYE.
WARAABYADA DANBAA LAGAGA BIXI, WAGACDA JIILAALE.
SOW INAD WARMAHA LOOSHATAAN, WAAJIB MA AHAANIN.

WAA DHANYAHAY

MAANSADAN WAXAA TIRIYEY NIN LA
ODHAN JIREY MAAHIR CIISE.

MAAHIR CIISE WAXAA LAGA LAAYEY NIMAN DHAWRA MARKAASUU WAX BADAN ERGO DIRAY ISAGOO KU DOONAYEY INUU HELO MAGTII NIMANKAA LAGA LAAYEY, MARKAASAA ERGADIINA WAXBA LAGA AQBALI WAAYEY, ISAGIINA WELIBA LOOGU DARAY DHAAR IYO HANJEBAD IYO AFLAGAADO BADAN. MARKAASUU MAANSADAN TIRIYEY DABADEEDNA WUXUU YIDHI;

WACDARAHA DHACAAYIYO NABSIGA, DABA WAREEGAAYA.
WISWIS BOW DANBAYN IYO WAREER, RUUXI WAARABA'E.
WAX LA ARAG WIXII HADHAYNA WAA, WAAYO GOONIYA'E.
WEEYE DHAHA WAX YAABLAAN ARKOO , WAA WARAMAYAAYE.
MUSLIMOW NIN WEHELKIISI IYO, WIILKI LAGA TOOGTEY.
OO UU WALAALKII RUMAAD WARAN AFLII, JIIDHAY.
OO WABARADIISII LA DILEY, WIIL YAR IYO SHEYBE.
AAN WAXARNA LAGA SIIN RAGGII, LAGA WARJEEFAAYEY.
OO AAN WADEECO IYO RABIN AADMI , WUXU YEELO.
OO AAN WANAAG DIIDIN IYO , WACAD INUU QAADO.
OO INU WIXIISIINA HELO BELANA , WEYNAANIN.
WAAYEELO DHAWRA IYO DIRAY, WAAYA ARAGOO DHAN.
AAN WAANADOODII LA MAQAL, GUURTIDII WAHA'E.
AY WELIBA RAADSHAAN ISAGA, AMA LA WEETEEYO.
OO WAABERKIYO LEYLKA DHEXE , GEED U GALO WAAYEY.
WIIRTAANYO IYO CIIL INTUU, WAY LA LEDI WAAYO.
SOW INU WISIISIYO DAGAAL, WAAJIB MA AHAANIN.

WAA DHANYAHAY